

Waxaanu Ping Pong ku badalnay Unikum

Xagaaga waxaa maamulka waxbarashadu badalayaa qaabka waxbarasho ee Ping Pong. Qaabka waxbarasho ee cusub magaciisu waa Unikum. Waxaanu rajaynaynaa in badalkan u dhaco si fiican, waad ku mahadsantahay dulqaadkaaga!

Sababtee ayaanu u badalaynaa qaabka waxbarasho?

Waxaanu samaynay naadinta iibsiga, taas oo Unikum ku guuleysatay. Unikum waxay leedahay hawlqabashooyin badan oo waxay taageero fiican u tahay nolol maalmeedka waxbaridda ee ardayda iyo macallimiinta.

Goorma ayaa uu meesha ka baxayaa Ping Pong?

1-da Julaay ayuu meesha ka baxayaa Ping Pong. Dhanka katrineholm.se/unikum ayaad ka helaysaa warbixin ku saabsan u badalka dhinaca Unikum. Sidaas darteed si dheeraad ah uga warhay boggan si aanay kuu dhaafin warbixinta muhiimka ee ku saabsan badalkan.

Goorma ayay suurtagal tahay in la galo Unikum?

9- Agoosto ayaad heli kartaa Unikum iyadoo la sii marayo Lärknuten oo aab-ka ku geli kartaa aqoonsiga elaktarooniga. Aab-kan magaciisu waa Unikum familj oo waxaad ka soo dejisanaysaa [App Store](#) ama [Google Play](#)

Maxaan ku samayn kartaa gudaha Unikum?

Gudaha Unikum waxaad samayn kartaa waxyaabo ay ka mid yihiin:

- helida warbixinaha ka yimi dugsiga xanaanada/iskoolka
- helida warbixnaha ka yimi macallimiinta ilmahaaga
- la xiriirka macallimiinta ilmahaaga
- ka aragto horumarka ilmahaaga
- ka aragto macluumaadka ilmahaaga iyo jadwalka (iskoolka)
- ka jawaabto casuumadaha wada hadalka horumarka
- helida warbixinaha ka yimi maamulka waxbarashada

Halkee ayaan ka helayaa jawaabta su'aalahayga?

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan Unikum ama wax ay shaqayn waayaan, waxaad adigu la xiriiri kartaa qaybta taageerada ee Lärknutensupport oo laga helayo larknuten@katrineholm.se

Unikum waxay diyaarisay filimo loogu talagalay adigaaga ah qofka haysta mas'uuliyadda sharci ee ilmaha. Waxaad filimadaas ka helaysaa dhanka [bogga intarnatka ee Unikum](#).